



Wasaaradda Cadaaladda Maraykanka

Qaybta Xuquuqda Madaniga

Qaybta Xuquuqda Muhaajirka Iyo Shaqaalaha

Shaqaale leh Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah (Temporary Protected Status, TPS) Ilaali Xaqaaga Shaqo

Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah ([Temporary Protected Status](#), TPS) waxay siisaa shaqaalaha xuquuq ku meel gaar ah oo ay ku joogaan Maraykanka. Haddii aad leedahay Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS, waxaad xaq u leedahay ogolaansho shaqo, oo sidoo kale loo yaqaan Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada (Employment Authorization Document, EAD). Kuwa leh Bixitaanka La Dhaqangalay ee Dib loo dhigay (Deferred Enforced Departure, DED) waxay kaloo xaq u leeyihiin inay shaqeeyaan. Inta badan xogta hoose waxay qusaysaa shaqaalaha Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD iyo Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS labadaba.

Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD gaagu waxa laga yaabaa inay sii ahaato mid ansax ah oo dhaaftay taariikhda uu dhacayo.

Markaad codsato oo aad hesho TPS Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga, dawladdu waxay u kordhin kartaa Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS dalkaaga. Tani waxay ka dhigan tahay inaad haysato ikhtiyaarka inaad ku sii jirto Maraykanka muddo dheer. Haddii dawladdu u kordhiso Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS dalkaaga, waxay ku daabici doontaa macluumaadka ku saabsan kordhinta Federal Register (Diiwaanka Federaalka). Tani waxaa ku jiri doona tilmaamo ku saabsan sida dib loogu diiwaan geliyo Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS oo loo codsado Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD cusub si aad u sii shaqeyso.

Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga waxa laga yaabaa in la kordhiyo wax ka badan taariikhda uu dhacayo Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD. Mararka qaarkood, dawladdu waxay si toos ah u kordhisaa Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD iyada oo loo marayo Federal Register marka ay ku dhawaaqdo kordhinta Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS. Ogeysiiska Federal Register ayaa kuu sheegi doona haddii Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaagu si toos ah u leeyahay taariikhda dhicitaanka cusub si aad u sii shaqeyso inta aad codsanayso oo aad sugto Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga cusub. Haddii ogeysiiska Federal Register uu si toos ah u kordhiyo Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga, uma baahnid inaad tusto dukumeenti kale si aad u sii shaqeyso. Booqo www.uscis.gov/tps macluumaadka ku saabsan Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS ee dalkaaga iyo ogeysiiska Federal Register.

Haddii dawladdu aysan si toos ah ugu kordhin Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga ogaysiis Federal Register laakiin aad codsatay inaad cusboonaysiiso Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD, waxaa laga yaabaa inaad sii wadato shaqada ka dib taariikhda dhicitaanka Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga, inta aad sugayso Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga cusub. Ilaa 540 maalmood ka dib taariikhda dhicitaanka Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD, waxaad soo bandhigi kartaa, caddayn ahaan ogolaanshahaaga inaad shaqeyso, Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS kaaga (laakiin aan ahayn DED) Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD oo wata rasiidka ogeysiis I-797C oo muujinaya in dawladdu heshay codsigaaga cusboonaysiinta Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD.

Qaar ka mid ah Xaalad Ilaalin oo Ku meel gaar ah TPS Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD ayaa laga yaabaa inay u qalmaan noocyada kale ee kordhinta. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan kordhinta tooska ah ee Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD, ka akhri [macluumaadkan](#) gudaha [Handbook for Employers M-274](#) (Buug-gacmeedka Loo-shaqeeyayaasha M-274). Waxaad sidoo kale wici kartaa Qaybta Xuquuqda Soogalootiga iyo Shaqaalaha ([Immigrant and Employee Rights Section](#), IER) wixii macluumaad dheeraad ah.

Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaagu wuu shaqaynayaa ilaa dhamaadka muddo kordhinta Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD.

Haddii Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaada lagu kordhiyo ogaysiiska Federal Register, Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaagu wuu shaqaynayaa ilaa dhammaadka muddo kordhinta Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD ee lagaga dhawaaqay Federal Register. Haddii Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaada la kordhiyo iyadoo lagu salaynayo codsigaaga dib u cusboonaysiinta Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD, waxaad kala shaqayn kartaa Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga rasiidka I-797C ilaa 540 maalmood ee dhaaftay taariikhda dhicitaanka ee ku qoran Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD. Haddii loo-shaqeeyahaagu uu aqbali waayo dukumeentigaaga ama uu ku weydiiyo dukumeenti dheeraad ah, wac Qaybta Xuquuqda Soogalootiga iyo Shaqaalaha IER waxaana laga yaabaa inaan ku caawinno. Iyada oo ku xiran xaqiiqda, loo-shaqeeyaha weydiiya dukumeenti dheeraad ah marka aan loo baahnayn waxay ku xad-gudbi kartaa sharciga Qaybta Xuquuqda Soogalootiga iyo Shaqaalaha IER wuxuu dhaqangeliyaa 8 U.S.C. § 1324b(a)(6).

Dhammaadka muddada kordhinta Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD, waxaad u baahan tahay inaad tusto loo-shaqeeyahaaga in lagu oggol yahay inaad sii shaqeyso.

Marka EAD muddada kordhintu dhammaato, Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaas hadda ma shaqeynayo. Halkaa marka ay marayso, loo-shaqeeyahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu arko dukumeentiga Form I-9 oo muujinaya ogolaanshahaaga shaqo. Dhamaadka muddo kordhintan, waa inaad haysataa Dukumentiga Ogolaanshaha Shaqada EAD kaaga cusub. Waxaad tusi kartaa loo-shaqeeyahaaga dukumeentiga ama doorashadaada hal [List A](#) document ama hal [List C](#) dukumeenti ka yimid Form I-9 Lists of Acceptable Documents (Form I-9 Liisaska Dukumentiyada La aqbali karo).

Qaybta Xuquuqda Soogalootiga iyo Shaqaalaha (Immigrant and Employee Rights Section, IER)

Khadka telefoonka ee shaqaalaha: 1-800-255-7688

www.justice.gov/ier | www.justice.gov/crt-espanol/ier

Wicitaanadu waxay noqon karaan qarsoodi, waxaana diyaar ah adeegyo luqadeed oo bilaash ah. TTY 1-800-237-2515

Adeegyada Socdaalka iyo Dhalashada Mareykanka (U.S. Citizenship and Immigration Services, USCIS)

1-800-375-5283

www.uscis.gov/tps

TTY 1-800-767-1833